



Hel caddeyn tallaalkaaga COVID-19

Bayaankaaga immunisation history statement wuxuu diiwaangelinayaa heerkaaga tallaalka COVID-19.

Habka ugu fudud ee lagu heli karo qoraalkaaga waa khadka tooska ah iyadoo la adeegsanayo midkood:

- xisaabtaada Medicare online ee khadka tooska ah ee loo maro myGov
- barnaamijka mobilada Express Plus Medicare.

Sida loo helo bayaankaaga immunisation history statement

Adeegsiga akownkaaga Medicare online ee khadka tooska ah ee loo maro myGov:

1. Gal myGov oo dooro **Medicare**.
2. Taagga **Immunisation history**, xulo Arag **View statement**.
3. Xulo magacaaga, ka dibna dooro **View history statement (PDF)**.

Isticmaalka barnaamijka moobiilka Express Plus Medicare:

1. Gal barnaamijka.
2. Ka dooro **Immunisation history** ee **Services**.
3. Xulo magacaaga, ka dibna dooro **View history statement (PDF)**.

Haddii aadan ka heli karin immunisation history statement khadka tooska ah ama aad u baahan tahay caawimaad, wac **1800 653 809**.

Haddii aadan haysan akowonka internetka ee Medicare

Waxaad ubaahantahay inaad kudhex xirto Medicare akownkaaga myGov si aad uga heshid akowonka Medicare.

Ku soo gal, ama abuur, akowonka myGov ee **my.gov.au**

Kadib waxaad ku xidhiidhi kartaa Medicare adoo adeegsanaya midkood:

- Lambarka kaadhkaaga Medicare iyo macluumaadka ku jira taariikhdaada Medicare
- lambarka isku xirka ee ay bixiso by Medicare.

Caawinaada ku xidhiidhinta Medicare iyo myGov, tag **servicesaustralia.gov.au/medicareguides**

Ka dhig macluumaadkaaga xidhiidhka Medicare mid cusub

Waa muhiim in macluumaadka xidhiidhka Medicare ay yihiin kuwo cusub. Waad arki kartaa oo cusbooneysiin kartaa fmacluumaadkaaga adoo isticmaalaya akowaankaaga internetka ee Medicare ama barnaamijka moobiilka Express Plus Medicare.

Haddii aadan xaq u lahayn Medicare ama Department of Veterans' Affairs (DVA)

Waxaad naga codsan kartaa Individual Healthcare Identifier (IHI) annaga si aad uga heshid soo koobitaan tallaal ah My Health Record. Tag servicesaustralia.gov.au/ihi wixii macluumaad dheeraad ah.

Wixii cusbooneysiin ah iyo talobixin cusub ee COVID-19, tag australia.gov.au

Wixii macluumaad dheeraad ah

- wac Translating and Interpreting Service (TIS National) ee **131 450** si aad noogala hadashid luqaddaada wixii ku saabsan adeegyada Medicare
- go to servicesaustralia.gov.au/ihs for more information in English
- tag servicesaustralia.gov.au/yourlanguage halkaasoo aad ka akhrisan karto, ka dhageysan karto ama ka daawan karto fiidiyowyo ay ku qoran yihiin macluumaad ku qoran afkaaga.
- Booqo xarun adeeg.

Fiiro gaar ah: wicitaanada taleefanka gurigaaga ee lambarrada '13' meel kasta oo Australiya ka mid ah waxaa lagu dalacayaa qiime go'an. Heerkaasi wuu ku kala duwanaan karaa qiimaha wicitaanka maxalliga ah wuxuuna sidoo kale ku kala duwanaan karaa kuwa bixiya adeegga taleefanka. Wicitaanada lambarrada '1800' ee taleefankaaga guriga waa lacag la'aan. Wicitaanada ka imanaya dadweynaha iyo taleefoonada gacanta waxaa laga yaabaa inay ku dhacaan wakhti qiimahoodana sarreeyo.